DUGSIYADA DADWEYNAHA BOSTON

XAFIISKA KORMEERAHA GUUD

Sibtember 12, 2011

Gacaliyayaal Bahda Dugsiyada Dadweynaha Boston,

Soo-dhawaada oo ku soo-noqosho wacan dugsiga! Waxaannu rajeyneynaa inaad soo qaadatay xagaa fan iyo wax-qabadba leh. Maanta, iyadoo ay hawadu soo qaboobeyso, waa waqtigii diiradda la saari lahaa waxayaalo waaweyn oo ka dhacaya Dugsiyada Dadweynaha Boston.

Waxaad arki doontaa isbeddello badan oo hagaajin doona waxbarashada iyo shaqada Dugsiyada Dadweynaha Boston BPS. Ardaydayada iyo shaqaaluhu waxay durba ku ashqaraareen **cuntooyinkeena kuwii hore ka dhadhanka wacan, ee ka cusub (fresh), ee ka nafaqada badan**. Taasi waxay ku timi shaqada adag iyo kooxdayada Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada iyo kuntaraad-qaate cusub oo wada sameeyey hagaajinta waaweyn ee ay ardaydayadu arkayaan maalin walba.

Is-beddeladayadu wey ka badan yihiin kuwa ka dhacaya kaafateeriyada. Waaxdayada **Caafimaadka iyo Fiyo-dhawrka** waxay leedahay shaqaale iyo hadaf cusub – inay si xoog leh u-fidiyaan jimicsiga jirka (physical education), waxbarashada caafimaadka (health education), iyo feejignaanka nafaqada (nutrition awareness). Dhawr bilood horteed, waxaannu soo marti-qaadnay qof ka mid ah kuwa ugu horeeya komuyuunatiga far-shaxanka ee Boston inuu naga caawiyo oo hogaamiyo **Barnaamijka Cusub ee Baahinta Farshaxanka (Arts Expansion Initiative).** Annagoo la shaqeyn doonna lamaanayaashayada, ugu yaraan toban kun oo arday oo dheeraad ah ayaa heli doona khibrad farshaxan iyo muyuusig oo ka badan intii heshay sannadkii hore. Marka kale dugsiyadeennu waa amaan. Iyadoo ay ku timi dadaalka shaqaalaha iyo ardayda, iyo weliba Xeerka Anshaxa ee cusub (Code of Conduct) iyo dariiqoon gaara oo ka-hortag ah oo wax lagu xalinayo, **waxaannu kala-bar dhinnay dhacdooyinkii xaga adaabta ee hore u-dhici jiray.**

Sannadkan waxa kale oo aannu bilaabi doonnaa **Barnaamij Cusub oo Akhris/Qoraal ah (Literacy initiative)** oo waxaannu hirgalin doonnaa olole amase kaambeyn aannu ku dhiiri-galineyno ardaydeena yaryar inay helaan farxadda akhriska. Ardaydu wey ku dhibtoonayaan akhriska haddii aanay hore u-helin aasaas adag oo akhris/qoraal (literacy) ah. Taasi waxay isu muujisaa siyaabo badan oo nasiibdarro ah. Arday dhigta fasalka saddexaad oo fasalka ku dhex wareeray wuxuu bishii fasalka ka maqnaan karaa dhawr jeer, taas oo ah calaamd hore oo sheegaysa mushkilad. Tiro-koobto (statistics) waxay muujineysaa ardayda dugsiga hoose ee si joogta ah uga maqnaada dugsiga inay heystaan jaanis ah midkiiba shan inay ka qalin-jabiyaan dugsiga sare. Wiilasha ayaa gabdhaha kaga badan inay dugsiga ka tagaan; oo weliba wiilasha "African American"ka ah ayaa ku jira khatarta ugu sarreeysa.

Annaga awoodayada ayey ku jirtaa inaan arrintaas beddelno. **Ajandhahayaga Xawaareynta (Acceleration Agenda)** ee shanta sano wuxuu diirad xoog leh saarayaa soo-yareynta faraqa (gaps) helidda iyo najaxidda (access and achievement) ee weli heysata arday badan oo dhigata dugsiyo badan oo ku yaalla komuyuunatiyo badan.

Haddafkayagu waa mid basiid ah: Dhammaan dugsiyadeenu waa inay bixiyaan fursado la mid kuwa ay bixiyaan dugsiyadeenna ugu wacani. Tusaale ahaan Dugsiga Hoose/Dhexe Orchard Gardens K-8, oo ah dugsi "Turnaround School" iyo "Pilot School" oo leh shaqaaleyn dabacsan inuu fasal walba u-dooro macalimiin haboon, oo maalin kasta siiyo afar saacadood oo waxbarasho oo dheeraad ah ardaydiisa fasalka lixaad taas oo ka badan waxyaalaha uu bixiyo dugsi caadi ah ku yaalla Boston "BPS". Taasi waxay la mid tahaylix bilood oo waxbarasho oo dheeraad ah oo la siiyey arday walba sannadkii. Dhammaan dugsiyadeennu waa inay awoodaan inay maalinta dugsiga

dheereeyaan oo dhammaan macalimiinteennu waa inay helaan waqti dheeraad ah oo ay wax qorsheeyaan oo wax diyaariyaan. Taas ayaan ku hawlannahay wada-hadalka aanu ugu jirno kunturaad xoog badan oo macalimiinta ah, sida aannu u-haajineyno sida aannu u taageerno macalimiinteenna iyo hogamiyayaalkeenna dugsi.

Annagoo siticmaaleynna habab cusub ee saynis, xisaab, tiknoolaji, akhris/qoraal, tayo macalin iyo meerin, Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) waxay dhammaan ardaydeenna u-diyaarinayaan inay jaamacd dhammeystaan oo ku guuleystaan shaqo. Ardaydeenna iyo sahqaalaheennu waxay mudan yihiin waxa ugu fiican. Waxaannu ku hanweynahay inaanu haysanno macalimiinta ugu mushaharka badan ee ugu taagerada badan ee Massachusetts iyo dalka oo dhan; waxaannu ku hanweynahay inaanu horumar ka sameyneyno ardaydeenna Bartayaalka Luqadda Ingiriisiga (English Language Learners) iyo inaanu leenahay kooxda waxbarshada gaarka (special education team) ugu fiican dalka; oo waxaannu ku hanweynahay inaynu sameyneyno waxyaalo badan inaanu soo-dhaweyno ardaydeenna iyo waalidiinteena. Had iyo jeer waxaannu jecelnahay inay kusri ka helaan miiska go'aan-gaarista ee ku saleysan dugsiga. Waa sababahaas iyo kuwo kale oo badan waxa Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) loogu magacaabay mid ka mid ah kuwa ugu horumarinta wacan dugsiyada degmooyinka ee dunida oo dhan.

Walidiinteennu waxay mar kasta xagga hore kaga jireen dadaaladayada aannu ku horumarineyno dugsiyada Boston. Waxaannu rajeyneunaa inaanu si soke kuula shaqeyno annagoo hadda bilaabeyna sannad kale oo wacan oo aynu wax-bareynno ardayda magaaladeena.

Niyad-samaan,

Carol R. Johnson
Kormeeraha Guud

Taleefanka "Back-to-School Hotline": (617) 635-9046
Is-qor ""BPS This Week"" "newsletter at bostonpublicschools.org/newsletters", oo nagal soco "Facebook" iyo "Twitter" @BostonSchools